



## **Xfiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

### **WARSAXAAFADEED 22/2010**

#### **Ergeyga Gaarka ah ee Xoghaya Guud ee Qaramada Midoobay oo ugu baaqay baarlamaanka inay muujiyaan isu tanaasulid markay ka hadlayaan xukuumadda**

Nayroobi, 22 November 2010 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Arrimaha Soomaaliya, Danjire Augustine P. Mahiga, ayaa maanta ugu baaqay xubnaha Baarlamaan Ku Meelgaarka Soomaaliyeed inay muujiyaan dareen isu tanaasulid ah oo si sharci ahaana uga doonaan xukuumadda cusub.

“Waxaan aaminsanahay in muddadii u dhexeysay waqtigii la ogolaaday Ra’iisal Wasaaraha iyo hadda loo adeegsaday si waxtar leh si loo helo xukuumad ka soo bixi karta waxay ummadda Soomaaliyeed ka filayso.

“Waxaan ku kalsoonahay in xildhibaanada Baarlamaanka ay adeegsan doonaan xilkasnimadii iyo wadajirkii ka dhexjirtay waqtigii ay ogolaanayeen Wasiirka Koowaad”, ayuu yiri Danjire Mahiga.

“Dadka Soomaaliyeed iyo bulshada caalamkuba waxay si aad ah uga dhursugayaan dhismaha xukuumad shaqeyn karta. Maadaama ay sagaal bilood uun ka haren dhammaadka xilliga ku meelgaarka, Soomaaliya waxay u baahantahay xukuumad soo diyaarisa qorshe hawleed isla markaasna fulisa arrimaha mudnaanta leh xilliga kala guurka.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)



## **Xfiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

“Sidaa darteed, waxaan mudaneyaasha baarlamaanka ka codsanayaa in gabagabada dooddoodu ay ahaato mid horumarinaysa geeddi socodka nabadda. Qaramada Midoobay iyo bulshada caalamku waxay diyaar u yihiin inay kaalmeeyaan xukuumadda cusub isla markii la ansaxiyaba”, ayuu yiri Danjire Mahiga.

Baarlamaanka Federaalka Ku Meelgaarka Soomaaliyeed ayaa kulmi doona 22ka bisha November 2010 si uu uga doodo ansaxinta xukuumadda cusub ee uu dhowaad soo magacaabay Ra’iisal Wasaare Maxamed Cabdullahi Maxamed.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)